

# Deeqda COVID-19 ee Daryeelka Ilmaha Dayrta

## 2021 ee DCYF

### Su'aalaha Badanaa La Iswaydiyo

**S: Maxaa loogu talo geley deeqdan lacagta ah?**

J: Si loo xaqijiyo xasiloona, shaqada, iyo dabacsanaanta nidaamka daryeelka ilmaha oo taageero bixiyayaasha iyo qoysaska inta lagu jiro safmarka COVID-19, Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay siisaa taageero toos ah bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee liisanka haysta si looga bixiyo kharashka kordhaya ee la xidhiidha safmarka COVID-19 iyo in la xaqijiyo in adeegyada daryeelka ilmaha ay heli karaan qoysasku.

**S: Yaa u qalma inuu dalbado deeqdan?**

J: Dhamaan bixiyayaashada daryeelka ilmaha ee haysta liisanka ee u shaqeeya caruurta.

**S: Waa maxay xadiga lacagtu?**

J: DCYF waxay isticmaashaa macluumaadka awooda ee liisanka iyo macluumaadka Nidaamka Bixinta Lacagta Adeegyada Bulshada (Social Service Payment System, SSPS) si ay ugu xisaabiso xadiga lacagta. Xadigu waxa uu muujinaya kharashka kala duwan ee la xidhiidha cabirka barnaamij kasta, sida soo socota:

Nooca Bixiyaha	Tirada caruurta ee Goobta U Adeegi Kartu Taas oo Ku Salaysan Awooda Liisan	Xadiga Lacagta
Bixiyayaasha u adeega qoysaska qaata kaabista*	65 ama ka yar	\$6,500
	66 ama ka badan	\$100 x awooda liisanka (\$20,000 ugu badnaan deeq ah)
Bixiyayaasha lacag-bixinta ee gaarka loo leeyahay	Ku munaasab maaha	\$6,500

\*Bixiyayaasha haysta ogolaanshaha kaabista ee shaqaynaya ama lahaa ogolaanshaha kaabsita firfircoon 2021.

DCFY waxay mudnaanta siin doontaa ka shaqaynta lacagta bixiyayaasha ka tirsan Bulshooyinka Walaaca Leh iyo Daryeelka Ilmaha ee Laga Cararay. DCYF waxay aqoonsan tahay inay jiri doonaan wakhti ay isku soo beegmaan. Bixiyayaasha kaliya waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan hal qayb (Bulshooyinka Walaaca Leh ama Daryeelka Ilmaha ee Laga Cararay) si ay u helaan mudnaanta ka shaqaynta bixinta lacagta.

Degmooyinka soo socda waxaa weeye Bulshooyinka Walaaca leh oo gaarka ah:

- |                |             |                |             |           |
|----------------|-------------|----------------|-------------|-----------|
| • Asotin       | • Jefferson | • Okanogan     | • Snohomish | • Whatcom |
| • Clallam      | • Kitsap    | • Pacific      | • Spokane   | • Yakima  |
| • Cowlitz      | • Klickitat | • Pend Oreille | • Stevens   |           |
| • Ferry        | • Lewis     | • Pierce       | • Thurston  |           |
| • Grays Harbor | • Mason     | • Skagit       | • Wahkiakum |           |



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

# Deeqda COVID-19 ee Daryeelka Ilmaha Dayrta 2021 ee DCYF

Sib koodhada soo socda waxa weeye Daryeelka Ilmaha Laga Cararay:

- |         |         |         |         |         |
|---------|---------|---------|---------|---------|
| • 98001 | • 98178 | • 98498 | • 98908 | • 99301 |
| • 98023 | • 98198 | • 98499 | • 98942 | • 99326 |
| • 98032 | • 98203 | • 98662 | • 98944 | • 99336 |
| • 98057 | • 98204 | • 98664 | • 99201 | • 99337 |
| • 98087 | • 98208 | • 98684 | • 99205 | • 99352 |
| • 98108 | • 98408 | • 98901 | • 99207 | • 99353 |
| • 98168 | • 98445 | • 98902 | • 99208 | • 99354 |

**S: Miyay tahay inaan iminka furnaado si aan ugu qalmo?**

J: Bixiyayaashu waa inay haystaan liisan furan si ay ugu qalmaan deeqda.

**S: Sidee ayay wax noqonayaan hadii aan si kumeel gaadh ah u xidhay COVID-19 dartiis? Weli ma dalban karaa?**

J: Bixiyayaasha wakhtigan u xidhan COVID-19 dartiis waxay dalban karaan Deeqda COVID-19 ee Daryeelka Ilmaha ee Dayrta 2021 ee DCYF.

**S: Ma inaan ku shaqeeyaa awooda liisankayga oo dhan si aan ugu qalmo?**

A: Maya. Hadii la ansixyo, bixiyahuuhu waxa uu heli doonaa xadiga deeqda ee la xidhiidha awooda liisanka, iyada oo aan loo eegeynintu wakhtigan ku jirta.

**S: Sidee ayaan u dalbanayaa deeqda?**

J: Bixiyayaashu waxay geli doonaan **Daaqada Bixiyehe WA Compass** oo waxay dooran doonaan daaqada soo boodaysa ee Deeqda COVID-19 ee Dayrta 2021 ee DCYF. Bixiyuhu waxa uu ka jawaabi doonaa su'aalo taxane ah oo kadibna waxa uu gudbin doonaa arjiga.

Kadib marka arjiga la xidho Maay 20, dhamaan arjiyada la gudbiyay ayay qiimayn doonaan gudidu, oo waxaa la wargelin doonaa dadka ogolaanshaha ama diidmada deeqda.

Daaqada Bixiyaha iminka waxay isticmaashaa Turjubaada Google (Google Translate) si ay u taageerto bixiyayaasha aan ku hadal Ingiriisiga. Qaabka Turjubaada Google waxaa laga heli karaa dhakada sare ee koonaha midig Daaqada Bixiyeyaha, sida ka muuqata hoos. Bixiyayaasha waxaa lagu dhiiri gelinayaan inay isticmaalaan qaabkan si ay u geli karaan gunooyinka nidaamka arjiga onleyinka ah.



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

Hadii aad tahay bixiye ku hadla Isbaanish ama Somali, waxa aad heli kartaa barnaamijka turjubaada inta aad buuxinayso PDF-ka la buuxin karo, sidoo kale Turjubaada Google oo iyana kuu dheer Daaqada Bixiyaha. Arjiga PDF ee turjuban waa la sawiri kara oo iimeel ayaa loogu diri karaa **dcyf.covidgrantinfo@dcyf.wa.gov**. Xubinta shaqaalaha DCYF ayaa gacanta ka gelin doonta Daaqada Bixiyaha WA Compass tan, halkaas oo bartaa laga sii wadi doono nidaamka qiimaynta.

Arjiga turjuban ayaa sidoo kale boosta loogu diri karaa DCYF Spring 2021 Child Care COVID-19 Grant, PO Box 40970, Olympia, WA 98504-0970. Fadlan ogsoonaw in arjiyada deeqda ee boosta lagu diray ay tahay inay ku sumadaysan tahay wakhti aan ka danbayn Maajo 20, 2021, oo waana in la helaa ugu danbayn Jimcaha, Maay 21, 2021 (DCYF kama masuul aha wixii dib u dhac ka yimaada shirkada soo qaadaya xageeda). Dalbadayaasha ayaa lagu dhiiri gelinayaa inay ku dalbadaan **Daaqada Bixiyaha ee WA Compass** ama iimeel ahaan sababtan darteed.

**S: Ma in aan buuxiyaa wax ka badan hal arji hadii aan leeyahay goobo/fasalo badan?**

J:Haa. Daaqada Bixiyaha, waxa aad ka badali kartaa goobta aad ku galayso dhanka bidix ee sare (ee ay ka muuqato "Magaca Xaruntu" ee ku jir sawirka sare). Arji kasta oo deeqda ah waxaa weeye liisan kasta oo haysato, xataa hadii ay dhisme kaliya ku wada yaalaan dhawr liisan.

**S: Sidee ayaa lacagta deeqda looga shaqeeyaa, oo goormaya ayaa la bixin doonaa?**

J: DCYF waxay wargelinaysaa bixiyayaasha xaalada deeqdooda iyo lacagta waxaa lasiin doonaa laga bilaabo dhamaadka Maay ilaa badhtamaha Juun. Fadlan waa inaad fahantaa nidaamka lacag bixinta elektorooniga ah iyo Adeega Boosta Maraykanka inay qaadanayso dhawr maalmood oo shaqo, oo ay saamaynayso taariikhda rasmiga ah ee lacagta la heli doono.

DCYF waxay mudnaanta siin doontaa ka shaqaynta lacagta bixiyayaasha ka tirsan Bulshooyinka Walaaca Leh iyo Daryeelka Ilmaha ee Laga Cararay oo heli doono lacagta marka kowaad.

DCYF waxay lacagta ku bixin doontaa SSPS. Hadii bixiyuhu uu wakhtigan ku qaato ama uu hore ugu qaatay lacag SSPS, waxa aad ku heli doontaa Deeqda Lacagta COVID-19 ee Daryeelka Ilmaha ee Dayrtta 2021 ee DCYF qaab lamid ah. Bixiyayaasha aan ku qaadan SSPS waxay ku heli doonaan Adeega Boosta Maraykanka oo waxaa loogu soo diri doonaa cinwaanka la xidhiidha lambarka SSPS.

**S: Ma cashuur ayaa laga qaadataa deeqdan?**

J: Haa. Deeqda waxaa loo arkaa dakhli. Ujeedooyinka cashuurta dartood, deeqda waa in loola dhaqmaa dhakhliyada kale ee ganacsiga laga helo oo kale. DCYF waxay diri doontaa foomka 1099 Janaayo cashuurta darteed. Foomka 1099 waxaa kamid ah dhamaan deeqdaha DCYF ee lagu bixiyo cashuurta mudada sanadka ah.

**S: Maxaa loo isticmaali karaa deeqdan?**

J: Deeqdan waa in lagu bixiyaa shayo taageeraya ganacsiyada daryeelka ilmaha si loo xaqijiyo in adeegyada lasii heli karo. Kharashka la ansixiyay qaybaha ah waxaa ay u qoran yihiin sida soo socota:

- **Adeegyada ganacsiga** sida taleefanka, internetka, laydhka, gaasta, biyaha, iyo adeegyada qashinka
- **Mushaharaadka (mushaharka iyo gunooyinka shaqaalah)**
  - Hadii uu yahay barnaamij Daryeelka Ilmaha Guriga Qoyska ah: mulkiilaha ganacsiga
- **Kharashaadka kirada/meesha**
  - Bixiyayaasha Daryeelka Ilmaha Guriga Qoyska - waxa ay noqonaysaa boqolkiiba inta guriga (hadii ay tahay kiro ama uu mulkiiluhu leeyahaya) ee loo isticmaalayo daryeelka ilmaha. Waxaa lagu talinayaa in bixiyayaashu ay la xidhiidhaan lataliyahooda dhaqaale ama xisaabiyahooda wixii tilmaamo ah ee tan ah.
- **Cunto**
- **Agabka Ilaalinta Shakhsii Ahaaneed (Personal Protective Equipment, PPE) (sida waji gashadyada, golofisyada)**
- **Agabka nadiifinta ee la xidhiidha COVID-19**
- **Adeega teknoolojiyada iyo internetka**

**S: Maxaan LOO isticmaali karin lacagtan?**

**A:** Dayactirka dhismaha ama xarunta, waxka badalka iyo wixii dheeraad ah ee lagu kordhinayo ee u baaha ruqsan waxaa loo arkaa hormarin rasamaal oo looma ansixin kharash ahaan.

**S: Miyaa lacagtan deeqda ah ay tahay in lagu isticmaalo mudo gaar ah?**

**J:** Haa. Lacagta waa in lagu wada isticmaalaa ugu danbayn Sebteember 30, 2021.

**S: Hadii aan lagu isticmaalin deeqdan mudadaas, oo ay tahay in aan gudo wixii aanan isticmaalin, sidee ayay markaa wax noqonaysaa marka la eego xadiga cashuurta?**

**J:** Hadii bixiyaha aanu ku wada isticmaalin xadiga oo dhamaystiran oo deeqda shayada lagu sheegey ah ugu danbayn Sebteember 30, 2021, waa inay la xidhiidhaan [dcyf.covidgrantinfo@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.covidgrantinfo@dcyf.wa.gov) si ay ugala hadlaan talaabooyinka xiga iyo sida ay tani u samaayn karto xadiga lagu sheegey foomka cashuurta 1099.

**S: Ma in aan kaydiyaa oo aan gudbiyo risiidhada la xidhiidha deeqdaa?**

**J:** Haa. Bixiyayaashu waa inay kaydiyan risiidhada ay wax ku iibsadeen lacagta deeqda mudo shan sano ah. Bixiyayaasha waxaa laga dalban karaa inay usoo gudbiyaan risiidhadooda DCYF. Hadii bixiyaha aan laga helin risiidhada iyo waraaqaha marka laga dalbado, waxaa laga dalban karaa inay dib u gudaan qayb kamid ah ama dhamaan lacagta la siiyay.

**S: Ma jirtaa mudo ay ku eeg tahay dalbashada deeqdani?**

**J:** Haa, waxa ay ku eeg tahay dalbashadu Maay 20, 2021, 12:00 duhurnimo.

**S: Deeqdani ma tartartan ayaa loo galayaa?**

**A:** Maya. Deeqaha looma galayo tartan. Laakiin, DCFY waxay mudnaanta siin doontaa ka shaqaynta lacagta bixiyayaasha ka tirsan Bulshooyinka Walaaca Leh iyo Daryeelka Ilmaha ee Laga Cararay.

**S: Miyaan u qalmaa hadii aan bixiyo daryeelka maqal iyo muuqaalka ah laakiin aanu ahayn daryeel meel la wada joogo?**

**A:** Maya. Bixiyayaashu waa inay ku siiyan daryel caruurta goobtooda ay liisanka ku haystaan.

**S: Waxa aan heley lacag la xidhiidha deeqda COVID-19 oo aan ka heley hay'ada deegaanka ah. Ma waxay keeneysaa taasi in aan u qalmo in aan helo Deeqda Covid-19 ee Daryeelka Ilmaha ee Dayrta 2021 ee DCYF?**

**J:** Maya, lacagta kale ee aad qaadato ma samaayn doonto u qalankaaga inaad dalbato Deeqda Covid-19 ee Daryeelka Ilmaha ee Dayrta 2021 ee DCYF.

**S: Yaan ula xidhiidhayaa wixii su'aalo ah?**

**J: La xidhiidh:**

- **Su'aalaha Arjiga**
  - Hadii aad su'aalo ka qabto arjiga, mudada deeqda, ama su'aalaha kale ee deeqda, fadlan iimeel u dir **dcyf.covidgrantinfo@dcyf.wa.gov**
- **Linkiga Daaqada Bixiyaha**
  - Si aad u gasho xisaabta ama aad u eegto macluumaadkaaga iyo macluumaadka liisanka, isticmaal linkigan si aad ugu gasho: [https://wacompass.force.com/PP\\_LoginPage#](https://wacompass.force.com/PP_LoginPage#)
- **Ma Geli Kartid Miyaa?**
  - Hadii aad u baahan tahay kaalmo gelitaanka xisaabta Daaqada Bixiyaha, fadlan iimeel u dir **dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov** ama la hadal 866-627-8929
- **Ma Waxa Aad U Baahan Tahay In Lagaa Caawiyo Arjiga Buuxintiisa?**
  - Hadii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta arjiga, kaas oo ah Daaqada Bixiyaha ama waraaqaha oo turjuban, la xidhiidh tobobaraha Wacyi Gelinta Daryeelka Ilmaha ee Washington wixii kaalmo ah. Hadii aanad garanaynin cida ah tobobarahaaga, waxa aad la hadashaa xafiiska Wacyi Gelinta Daryeelka Ilmaha deegaankaaga ee hoos ku qoran:
    - Child Care Aware of Central Washington: 877-965-7109
    - Child Care Aware of Eastern Washington: 800-446-2229
    - Child Care Aware of King County: 206-329-1011
    - Child Care Aware of Pierce County: 253-272-8000
    - Child Care Aware of Northwest Washington: 360-734-8396
    - Child Care Aware of the Olympic Peninsula: 360-786-8907
    - Child Care Aware of Southwest Washington: 360-952-3358